



# Shukulaatada Muuska Leh ee La Cantuugo

Xaddiga Cuntada 10 | Waqtiga diyaarinta 1 saac 15 daqiiqo. |  
Waqtiga guud 1 saac 15 daqiiqo.

**Qalabka:** Xaashida saloolka, Xaanshida saliida  
ama sufurka, Baaquliga yar ee cunto-diiriya  
ku habboon

**Maacuunta:** Mindi, Fargeeto ama qaaddo  
cuntada lagu walaajo, koobabka iyo  
qaaddooyinka cuntada lagu cabbiro

## Maaddoooyinka

3 muus oo bisil  
1/4 koob oo laws la shiiday ah oo saloogan  
1/2 koob oo jababka shukulaatada madow ah  
2 qaaddo shaah oo saliid cadeey ah AMA  
saliida kanola

## Macluumaadka Nafaqada:

Kalooriyada 120  
Dufanka Guud 7g  
Cusbada 30mg  
Karbonhaydaraydhka Guud 14g  
Borotiinka 1g

## Tilmaamaha

1. Kahor inta aadan hawsha bilaabin, dhaq gacmahaaga, sagxadaha, iyo maacuunta.
2. Fiiq oo u saaf muuska gabal-gabal wareeg ah oo dhan 1/4 inji. Dulsaar tiish ama sufur saxanka weyn ama saxanka foornada ee yar.
3. Mari bar ka mid ah gabalada buuska qiyaastii 1/4 qaaddo shaah oo lawska shiidian ah. Dusha ka daar jeex kale si aad u samayso ismariska muuska iyo lawska shiidian leh. Ku celi ilaa dhammaan xaleefyada muuska ay iska dul fulaan iyagoo qiyaastii 30 cantuugo (qiyaastii 10 "ismaris" muuskiiba.)
4. Saar lumadaha saxanka foornada ee diyaarsan, oo ku geli barafeeyaha si aad u adkayso, qiyaastii 30 daqiiqo ilaa 1 saac.
5. Kadib marka cantuugoooyinka muuska ah la barafeeyo, bilow inaad dhalaaliso shukulaatada. Ku rid jajabka shukulaatada ah iyo saliida baaquliga yar ee ku habboon cunto-diiriya, si tartiib ah isugu qas si saliidda ugu gaarto shukulaatada si siman. Ku kululee cunto-diiriya ilaa 1 daqiiqo, walaaq oo ku kululee cunto-diiriya ilaa 30 ilbiriqsi oo dheeraad ah ilaa shukulaatadu si buuxda uga dhalaasho. Ha dhaafin 2 daqiiqo ka badan wakhtiga dhalaalinta, maadaama shukulaatadu ayaa guban karto.
6. Ka dib marka shukulaatada dhalaasho, ka soo saar cantuugada muuska ah gudaha barafeeyaha. Ku dhex rid gabal kasta oo muuska barafaysan ah shukulaatada la dhalaaliyay si qaybta hoose ee gabal kasta loogu dhaaro shukulaatada.
7. Saar gabalada shukulaatada ah ee daboolan saxanka foornada. Marka dhammaan ismarisyada la dhex geliyo ku soo celi barafeeyaha ilaa 15 daqiiqo ama ilaa shukulaatadu ka barafowdo. Gur isla markiiba.